وَقُل رَّبِّ ٱغۡفِرۡ وَٱرۡحَمۡ وَأَنتَ خَيۡرُ ٱلرَّٰحِمِينَ ١١٨

118. Waxaad Dhahdaa Eebow Dhaaf oo Naxariiso adaa Naxariiste u Khayr Roone.

Gaalada Xisaabtu way ka Lumi Qiyaamada, mana Gartaan intay Adduunka ku Noolaayeen, waxayse Sheegi inay Maalin ama Maalin Badhkeed ku Noolaayeen Iyagooy la Yaraatay dhibka Dartiis, Wax yar bayse ku Noolaayeen hadday Garan, Dadkana Ciyaar looma Abuurin, Waxaana Sarreeya Eebaha Xaakimka Xaqa ah, ee Carshiga Sharafta leh iska leh, Ciddii Caabuda oo Xumaan iyo Gaalimo ku Raacda wax kale Eebe la Jirkiisa Eebaa Xisaabin’Gaalana ma Liibaanaan, Dambi Dhaaf iyo Naxariisna Eebaa leh oo hanta. Al-Mu’minuun (112-118).

# Suurat An-Nuur

# سُورَةُ النُّورِ

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

Magaca Eebe Yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis Guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

سُورَةٌ أَنزَلۡنَٰهَا وَفَرَضۡنَٰهَا وَأَنزَلۡنَا فِيهَآ ءَايَٰتِۭ بَيِّنَٰتٖ
لَّعَلَّكُمۡ تَذَكَّرُونَ ١

1. (Tani) waa Suurad aan Soo Dejinay oo Faralnay (wax ku Caddaynay) kuna soo Dejinay Dhexdeeda Aayaad Cad Cad inaad wax Xusuusataan (waano qaada Taan)

ٱلزَّانِيَةُ وَٱلزَّانِي فَٱجۡلِدُواْ كُلَّ وَٰحِدٖ مِّنۡهُمَا مِاْئَةَ جَلۡدَةٖۖ
وَلَا تَأۡخُذۡكُم بِهِمَا رَأۡفَةٞ فِي دِينِ ٱللَّهِ إِن كُنتُمۡ تُؤۡمِنُونَ بِٱللَّهِ
وَٱلۡيَوۡمِ ٱلۡأٓخِرِۖ وَلۡيَشۡهَدۡ عَذَابَهُمَا طَآئِفَةٞ
مِّنَ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ ٢

2. Zaaniyadda (Haween) iyo Zaaniga (Ragga) Garaaca mid kastoo ka mid ah Boqol Garaac yeyna Idiin Qabanin Xagooda Naxariis Diinta Eebe Dhexdeeda Haddaad Tihiin kuwa Rumeeyey Eebe iyo Maalinta Dambe (Qiyaamada) hana Joogo Garaacooda Koox ka Mid ah Mu‘miniinta.

ٱلزَّانِي لَا يَنكِحُ إِلَّا زَانِيَةً أَوۡ مُشۡرِكَةٗ وَٱلزَّانِيَةُ
لَا يَنكِحُهَآ إِلَّا زَانٍ أَوۡ مُشۡرِكٞۚ
وَحُرِّمَ ذَٰلِكَ عَلَى ٱلۡمُؤۡمِنِينَ ٣

3. Zaani ma Guursado waxaan Zaaniyad ahayn, ama Gaal, Zaaniyadna ma Guursato waxaan Zaani ahayn ama Gaal, waana laga Reebay Arrintaas Mu‘miniinta.

وَٱلَّذِينَ يَرۡمُونَ ٱلۡمُحۡصَنَٰتِ ثُمَّ لَمۡ يَأۡتُواْ بِأَرۡبَعَةِ شُهَدَآءَ
فَٱجۡلِدُوهُمۡ ثَمَٰنِينَ جَلۡدَةٗ وَلَا تَقۡبَلُواْ لَهُمۡ شَهَٰدَةً أَبَدٗاۚ
وَأُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلۡفَٰسِقُونَ ٤

4. Kuwa (Zino) ku Gana (Sheega) Haweenka Dhawrsoon oon Afar Marag ah keenin Garaaca Siddeetan Garaacood,hana ka Aqbalina Marag Waligood,kuwaasina waa uun Faasiqiin.

5. Marka laga Reebo kuwa Toobad Keena intaas ka Dib oo Wanaajiya, Eebana waa (Dambi) Dhaafe Naxariista.

إِلَّا ٱلَّذِينَ تَابُوا۟ مِنۢ بَعْدِ ذَٰلِكَ وَأَصْلَحُوا۟ فَإِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ
رَّحِيمٌ ٥

**Suuraddan waa Suurad wayn, wax badanna ka waranta Aadaabta Islaamka, oyna Haboontahay in la Fahmo, waxayna ku Billaabatay in Eebe soo Dejiyey kuna Cadeeyay Aayaad, waxaa ku Xiga Ciddii Zino la Timaadda Rag iyo Haweenba oon horay wax u Guursan in lala Dhaco Boqol Ulood, oon loona Nixin, Maragna loo Yeelo, iyo in Dadka Xun Xun Iyagu isku Haboonyihiin oo Zaani iyo Gaal uu Guursan mid la Mid ah'lagana Reebay Mu'miniinta, Gaalada Kitaabka leh waa laga Hadlay Wayna Bannaanyihiin guurka Haweenkoodu, Tan kale Ciddii Qadafta Ruux Dhawrsoon kuna Sheegta Zino Afar Marag la'aan waa In lala Dhaco Siddeetan Ulood'lagana Aqbalin Marag Waligiis'Ciddii Toobad keenta oo Wanaagsanaata Mooyee, waxayna ku Tusin Xumida Zinada, Dhawridda Sharafta Muslimka iyo Wanaagga Diinta Islaamka. An-Nuur (1-5).**

---

6. Kuwa Qadfa (Zino ku Sheega) Haweenkooda oon Marag aan Naftooda ahayn Lahayn midkood Maraggiisu waa inuu ku Marag Kaco Dhaarta Afar Dhaarood Eebe inuu Run Sheegi

وَٱلَّذِينَ يَرْمُونَ أَزْوَٰجَهُمْ وَلَمْ يَكُن لَّهُمْ شُهَدَآءُ إِلَّآ أَنفُسُهُمْ
فَشَهَٰدَةُ أَحَدِهِمْ أَرْبَعُ شَهَٰدَٰتٍۭ بِٱللَّهِ ۙ إِنَّهُۥ
لَمِنَ ٱلصَّٰدِقِينَ ٦

7. Tan Shanaad waa inuu ku Dhaarto in Lacanadda Eebe ku Dhacdo hadduu Beenaale yahay.

وَٱلْخَٰمِسَةُ أَنَّ لَعْنَتَ ٱللَّهِ عَلَيْهِ إِن كَانَ
مِنَ ٱلْكَٰذِبِينَ ٧

8. Waxaa Ka rida Iyadana Ciqaabta inay ku Dhaarato Afar Dhaarood inuu Beenaale yahay.

وَيَدْرَؤُا۟ عَنْهَا ٱلْعَذَابَ أَن تَشْهَدَ أَرْبَعَ شَهَٰدَٰتٍۭ بِٱللَّهِ ۙ
إِنَّهُۥ لَمِنَ ٱلْكَٰذِبِينَ ٨

9. Tan Shanaadna waxay ku Dhaaran in Cadhada Eebe ku Dhacdo hadduu Run Sheegi.

وَٱلْخَٰمِسَةَ أَنَّ غَضَبَ ٱللَّهِ عَلَيْهَآ إِن كَانَ
مِنَ ٱلصَّٰدِقِينَ ٩

10. Hadduuna Jirin Fadliga Eebe iyo Naxariistiisa Korkiinna oosan ahayn Toobad Aqbal Badane Falsan «Waxaa Beenaalaha ku Dhici lahaa Cadaab Daran».

وَلَوْلَا فَضْلُ ٱللَّهِ عَلَيْكُمْ وَرَحْمَتُهُۥ وَأَنَّ ٱللَّهَ
تَوَّابٌ حَكِيمٌ ١٠

**Sidoo kale Ninkii Haweenaydiisa Zino ku Sheega waxaa Garaacidda ka Reebi inuu shan Goor Eebe ku Dhaarto inuu Run Sheegi, iyana waxay Dhaaran Shan jeer inuu Been Sheegi, ka dibna way kala Furmi, waxaana loo Yaqaanaa Licaan. Diinta Islaamkuna waa diin Sharaf iyo Naxariis, Doonina mayso inay Cidaan wax ku Caddayn Ceebayso, hase yeeshee uma Dul Qaadato waxa Sharafta Dhaawaca'sida ku Sheega Zinada iyo wax la Mid ah, Mase Fududa in Dadka lagu Sheego waxaan jirin oon Caddayn, waxaa Xadiith ku sugnaatay: Seddex Eebaa ka Xarrimay Jannada, Midka Khayaamada Sameeya, Kan Caasiya Waalidka, iyo kan Ehelkiisa ku Suga Xumaanta. Tan kale ma Banaana in Been lagu Dhaarto'waxayna ka mid tahay waxyaalaha Dadka Naarta Galiya, Saas darteed Zino Hawdhawaan, Cidna Zino ha ku Sheegin Adoon Hubin, Dhabtana Indhaha ka Qabsan, Xuduuda Diinta iyo Islaamka Ilaahi, Wanaaga ku Dadaal, Xumaanna ka Dadaal. An-Nuur (6-10).**

11. Kuwa la Yimid Been Abuurka (Qadafka Caasho) waa Koox Idinka mid ah, How Malaynina inay Shar Idiin tahay, waxayse idiin tahay Khayr, Qof kasta oo ka Mid ahna waxaa u Sugnaaday wuxuu kasban oo Dambi ah midka Qaatay Waynanka Arintana oo ka mid ah wuxuu Mudan Cadaab weyn (Ibnu Salool).

إِنَّ ٱلَّذِينَ جَآءُو بِٱلۡإِفۡكِ عُصۡبَةٞ مِّنكُمۡۚ لَا تَحۡسَبُوهُ شَرّٗا
لَّكُمۖ بَلۡ هُوَ خَيۡرٞ لَّكُمۡۚ لِكُلِّ ٱمۡرِيٕٖ مِّنۡهُم مَّا ٱكۡتَسَبَ
مِنَ ٱلۡإِثۡمِۚ وَٱلَّذِي تَوَلَّىٰ كِبۡرَهُۥ مِنۡهُمۡ لَهُۥ
عَذَابٌ عَظِيمٞ ﴿١١﴾

12. Maxaydaan Markaad Maqasheen Xaalka (Qadafka) ayna ugu malayn Mu‘miniinta ragga iyo Haween Naftooda Khayr, oyna u Dhihin Kaasi waa Been Abuur Cad.

لَّوۡلَآ إِذۡ سَمِعۡتُمُوهُ ظَنَّ ٱلۡمُؤۡمِنُونَ وَٱلۡمُؤۡمِنَٰتُ
بِأَنفُسِهِمۡ خَيۡرٗا وَقَالُواْ هَٰذَآ إِفۡكٞ مُّبِينٞ ﴿١٢﴾

13. Mayse u Keenaan Korkiisa Afar Marag, Haddayna keenin Marag kuwaasu Eebe Agtiisa waxay ku Yihiin Beenaalayaal.

لَّوۡلَا جَآءُو عَلَيۡهِ بِأَرۡبَعَةِ شُهَدَآءَۚ فَإِذۡ لَمۡ يَأۡتُواْ
بِٱلشُّهَدَآءِ فَأُوْلَٰٓئِكَ عِندَ ٱللَّهِ هُمُ ٱلۡكَٰذِبُونَ ﴿١٣﴾

14. Hadduuse Jirin Fadliga Eebe ee Korkiinna iyo Naxariistiisa Adduun iyo Aakhiraba waxaa Idin Taaban lahaa waxaad Dhexgasheen Dartiis Cadaab weyn.

وَلَوۡلَا فَضۡلُ ٱللَّهِ عَلَيۡكُمۡ وَرَحۡمَتُهُۥ فِي ٱلدُّنۡيَا وَٱلۡأٓخِرَةِ
لَمَسَّكُمۡ فِي مَآ أَفَضۡتُمۡ فِيهِ عَذَابٌ عَظِيمٌ ﴿١٤﴾

15. Markaad kula kulmaysaan Qadafka Carrabkiinna oo ku Dhahaysaan Afkiinna waxaydaan Ogayn, una Malaynaysaan wax Fudud Isagoo Eebe Agtiisa ku wayn.

إِذۡ تَلَقَّوۡنَهُۥ بِأَلۡسِنَتِكُمۡ وَتَقُولُونَ بِأَفۡوَاهِكُم مَّا لَيۡسَ
لَكُم بِهِۦ عِلۡمٞ وَتَحۡسَبُونَهُۥ هَيِّنٗا
وَهُوَ عِندَ ٱللَّهِ عَظِيمٞ ﴿١٥﴾

Aayadahan waxay soo Degeen markay Munaafiqiintu Isku Dayeen inay Dhaawacaan Sharafta Sayido Caa‘isha Bintu Abii Bakar, ahaydna Haweeneeydii Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Waxaana Arrintaas Hogaaminayay Munaafiqii Waynaa Cabdullaahi Binu Ubayi Binu Salool, Haseyeeshee wuu ku Khasaaray Adduun iyo Aakhiraba, Eebaana ku soo Dejiyey Quraan ka Bari yeeli Caa‘isha waxaa soo kale, Mu‘miniintuna fari inay ka Fogaadaan Maqalka Beentaas oo kale, Wanaagana ku Dadaalaan. An-Nuur (11-15).

---

16. Markaad Maqasheen Maad Dhahdaan Nooma Habboona Inaan ku Haddallo kan, Eebaa Nasahan ee kan (Qadafka) waa Been Abuur wayn.

وَلَوۡلَآ إِذۡ سَمِعۡتُمُوهُ قُلۡتُم مَّا يَكُونُ لَنَآ أَن نَّتَكَلَّمَ
بِهَٰذَا سُبۡحَٰنَكَ هَٰذَا بُهۡتَٰنٌ عَظِيمٞ ﴿١٦﴾

17. wuu idinka Waanin Eebe inaad u Noqotaan Isagoo kale Waligeed Haddaad Tihiin Mu‘miniin.

يَعِظُكُمُ ٱللَّهُ أَن تَعُودُواْ لِمِثۡلِهِۦٓ أَبَدًا
إِن كُنتُم مُّؤۡمِنِينَ ﴿١٧﴾

18. Wuxuuna idiin Caddayn Eebe Aayaadkiisa, Eebana waa Oge Falsan.

وَيُبَيِّنُ ٱللَّهُ لَكُمُ ٱلْءَايَٰتِ ۚ وَٱللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴿١٨﴾

19. Kuwa Jecel inay ku Faafto Xumaantu KuwaRumeeyey (Xaqa) waxaa u Sugnaaday Cadaab daran Adduun iyo Aakhiraba, Eebena waa Ogyahay idinkuna ma Ogidin.

إِنَّ ٱلَّذِينَ يُحِبُّونَ أَن تَشِيعَ ٱلْفَٰحِشَةُ فِى ٱلَّذِينَ
ءَامَنُوا۟ لَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ فِى ٱلدُّنْيَا وَٱلْءَاخِرَةِ ۚ
وَٱللَّهُ يَعْلَمُ وَأَنتُمْ لَا تَعْلَمُونَ ﴿١٩﴾

20. Hadduuna jirin Fadliga Eebe ee Korkiina iyo Naxariistiisa iyo in Eebe yahay Naxariis badane Ilaaliya, (Waxaa ahaan lahaa wax kale).

وَلَوْلَا فَضْلُ ٱللَّهِ عَلَيْكُمْ وَرَحْمَتُهُۥ وَأَنَّ ٱللَّهَ
رَءُوفٌ رَّحِيمٌ ﴿٢٠﴾

21. Kuwa (Xaqa) Rumeeyow ha Raacina Tallaabooyinka (camalka) Shaydaanka Ciddii Raacda Tallaabooyinka Shaydaanka Isagu wuxuu Faraa Xumaanta iyo waxa la Naco, Hadduusan jirin Fadliga Eebe ee Korkiinna iyo Naxariistiisa ma Daahirineen Ruux idinka Mid ah Waligeed,Laakiin Eebaa Daahiriya Cidduu Doono, Eebana waa Maqle Og.

۞ يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا تَتَّبِعُوا۟ خُطُوَٰتِ ٱلشَّيْطَٰنِ ۚ
وَمَن يَتَّبِعْ خُطُوَٰتِ ٱلشَّيْطَٰنِ فَإِنَّهُۥ يَأْمُرُ بِٱلْفَحْشَآءِ
وَٱلْمُنكَرِ ۚ وَلَوْلَا فَضْلُ ٱللَّهِ عَلَيْكُمْ وَرَحْمَتُهُۥ مَا زَكَىٰ
مِنكُم مِّنْ أَحَدٍ أَبَدًا وَلَٰكِنَّ ٱللَّهَ يُزَكِّى
مَن يَشَآءُ ۗ وَٱللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿٢١﴾

Kuma Haboona Mu‘miniintu inay Waxaa soo kale ku Hadlaan, ee waa inay Dhahaan Eebaa Nasahane waa been Abuurasho Wayn, waana inay Qaataan waanada Eebe. Tan kale kuwa Jecel inay Xumaantu ku Faafto Mu‘miniinta waa kuwo Ciqaab Mudan Adduun iyo Aakhiraba, waana in Laga Fogaado lagana Digtoonaado Shaydaan iyo Jidkiisa, Illeen Xumaan umbuu Fariye.
Caalamkuna wuxuu ku Dhisanyahay Fadliga Eebe iyo Naxariistiisa Cid Wanaagsanaana ma jiro Naxariista Eebe la‘aanteed. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Ruuxu Wuxuu ku Hadlaa Kalimo Cadho Eebe ah oosan Ogayn intay Gaadhi Uguna Hooban Naarta Darteed wax ka Fog Cirka iyo Dhulka Dhexdooda. (Waa Saxiis). An-Nuur (16-21).

---

22. Yeyna ku Dhaaranin kuwa Fadliga (Dheeraadka) leh iyo Hodanimada inayan wax siinayn Qaraabada, Masaakiinta iyo kuwa ku Hijrooda Jidka Eebe, hana iska Cafiyaan hana Saamaxeen, miyeydaan Jeclayn inuu idiin Dhaafo Eebe, Ilaahayna waa Dhaafe Naxariista.

وَلَا يَأْتَلِ أُو۟لُوا۟ ٱلْفَضْلِ مِنكُمْ وَٱلسَّعَةِ أَن يُؤْتُوٓا۟ أُو۟لِى
ٱلْقُرْبَىٰ وَٱلْمَسَٰكِينَ وَٱلْمُهَٰجِرِينَ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ ۖ
وَلْيَعْفُوا۟ وَلْيَصْفَحُوٓا۟ ۗ أَلَا تُحِبُّونَ أَن يَغْفِرَ ٱللَّهُ لَكُمْ ۗ
وَٱللَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٢٢﴾

23. Kuwa Gana «Qadfa» Haweenka Dhawrsoon ee Halmaansan (Xumaanta) ee Mu‘minaadka ah waa La Lacnaday Adduun iyo Aakhiraba, waxayna Mudan Cadaab Weyn.

إِنَّ ٱلَّذِينَ يَرْمُونَ ٱلْمُحْصَنَٰتِ ٱلْغَٰفِلَٰتِ ٱلْمُؤْمِنَٰتِ
لُعِنُوا۟ فِى ٱلدُّنْيَا وَٱلْءَاخِرَةِ وَلَهُمْ عَذَابٌ عَظِيمٌ ﴿٢٣﴾

24. Maalinta Ay ku Marag-kici Carrabadoodu, Gacmahoodu, iyo Lugahoodu waxay Camalfaleen.

يَوْمَ تَشْهَدُ عَلَيْهِمْ أَلْسِنَتُهُمْ وَأَيْدِيهِمْ وَأَرْجُلُهُم
بِمَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿٢٤﴾

25. Maalintaas wuxuu u oofin Eebe Abaal Marintooda Sugan,waxayna Ogaan in Eebe Yahay Xaqa Cad (Sugan).

يَوْمَئِذٍ يُوَفِّيهِمُ ٱللَّهُ دِينَهُمُ ٱلْحَقَّ وَيَعْلَمُونَ
أَنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلْحَقُّ ٱلْمُبِينُ ﴿٢٥﴾

26. Haweenka iyo Hadalka Xunba wuxuu u Sugnaaday Nimanka Xun, kuwa Xunna waxay u sugnaadeen kuwa Xun, Kuwa Wanaagsanna waxay u sugnaadeen Kuwa Wanaagsan, kuwaasna (Caa‘isha iyo Ehelkeedu) waa Ka Bari (Dheeryihiin) waxay Sheegi, waxayna Mudan Dambi Dhaaf iyo Rizqi Sharaf leh (Janno).

ٱلْخَبِيثَٰتُ لِلْخَبِيثِينَ وَٱلْخَبِيثُونَ لِلْخَبِيثَٰتِ
وَٱلطَّيِّبَٰتُ لِلطَّيِّبِينَ وَٱلطَّيِّبُونَ لِلطَّيِّبَٰتِ
أُو۟لَٰٓئِكَ مُبَرَّءُونَ مِمَّا يَقُولُونَ لَهُم
مَّغْفِرَةٌ وَرِزْقٌ كَرِيمٌ ﴿٢٦﴾

**Waxaa Jiray Nin Sayid Abuu Bakar Qaraabo u ahaa lana Noolaa oo wax yar ku Hadlay Arrintii Caa‘isha, Markaas Abuu Bakar Eryay kana Joojiyey Kaalmadii, markaas Eebe ku Yar Canaantay Abuu Bakar Xaalkaas, markaas uu soo Celiyey. Aayadaha kalana waxay ka Warrami in Haweenka Sharafta leh ee Dhawrsoon ee Xaqa Raacay kuwa Ceebeeya ay la Kulmi Lacnad iyo Cadaab wayn Aakhiro iyo Addunba oy kuna Marag furi Xubnahoodu'Lana Abaal Marin ayna Ogaan in Eebe Xaq Sugan Yahay, Illeen Xumaan Waxaa Muta kuwa Xun, Samaanna Waxaa Muta Kuwa Fiican.**
**Caa‘ishana waa ka Bari Kana Fog waxay ku Sheegeen'waxayna Mudan kuwaas la Dhibay Dambi Dhaaf iyo Janno, Saasuuna Eebe ugu Bari yeelay Caa‘isha Aayadahan, Ciqaabna ugu Xukumay Munaafiqiintii ka Qayb Gashay Arrintaas, Taasina waxay Muujin in Eebe u Gargaari Addoomadiisa Dhawrsoon ee Suuban. An-Nuur (22-26).**

---

27. Kuwa (Xaqa) Rumeeyow ha Galina Guryo aan Kuwiinna ahayn Intaad ka Idam Warsataan kana Salaantaan Ehelkooda, Saasaana idiin Khayr Roon si aad u Xusuusataan.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا تَدْخُلُوا۟ بُيُوتًا
غَيْرَ بُيُوتِكُمْ حَتَّىٰ تَسْتَأْنِسُوا۟ وَتُسَلِّمُوا۟
عَلَىٰٓ أَهْلِهَا ذَٰلِكُمْ خَيْرٌ لَّكُمْ لَعَلَّكُمْ تَذَكَّرُونَ ﴿٢٧﴾

28. Haddaydaan ka Helin Dhexdeeda Ruuxna ha Galina inta Laydinka Idmi, Haddii laydindhaho Noqdana Noqda, Saasaa idiin Wanaagsan, Eebana Waxaad Falaysaan wuu Ogyahay.

فَإِن لَّمْ تَجِدُوا۟ فِيهَآ أَحَدًا فَلَا تَدْخُلُوهَا
حَتَّىٰ يُؤْذَنَ لَكُمْ وَإِن قِيلَ لَكُمُ ٱرْجِعُوا۟ فَٱرْجِعُوا۟
هُوَ أَزْكَىٰ لَكُمْ وَٱللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ عَلِيمٌ ﴿٢٨﴾

29. Ma aha Korkiinna Dhib (Dambi) Inaad Gashaan Guryo aan la Deganayn oo Dan (Anfaco) idiinku Jirto, Eebe wuxuu Ogyahay waxaad Muujinaysaan iyo waxaad Qarinaysaan.

لَّيْسَ عَلَيْكُمْ جُنَاحٌ أَن تَدْخُلُوا۟ بُيُوتًا غَيْرَ مَسْكُونَةٍ
فِيهَا مَتَٰعٌ لَّكُمْ وَٱللَّهُ يَعْلَمُ مَا تُبْدُونَ
وَمَا تَكْتُمُونَ ﴿٢٩﴾

30. Waxaad ku Dhahdaa Mu‘miniinta Ha Laabeen Indhahooda (Daymada

قُل لِّلْمُؤْمِنِينَ يَغُضُّوا۟ مِنْ أَبْصَٰرِهِمْ

Reeba) hana ka Dhawreen Furuuj-
tooda (Zinada) saasaa u Wanaagsan,
Eebana wuu Ogyahay waxay Sameyn.

وَيَحْفَظُوا فُرُوجَهُمْ ذَٰلِكَ أَزْكَىٰ لَهُمْ إِنَّ اللَّهَ
خَبِيرٌ بِمَا يَصْنَعُونَ ﴿٣٠﴾

**Aayadahani waxay ku Tusin Wanaagga iyo Aadaabta Diinta Islaamka, oo ah in la Dhawro Guryaha Dadka, oon Lana Galin Idan iyo Salaan La'aan, Wanaagguna waa saas, Haddaan Dad Joogin Lama Galo intaad Idam ka Hesho, Haddii Noqda laydin Dhahana Noqda Saasaa Idiin fiicane, Haddayse Guryuhu Yihiin kuwa aan Dad kale Deganayn ee ah kuwa Dadka u dhexeeya Galidoodu.**
**Dambi kaama saarra Haddaad Gashid. Eebana waa Ogyahay waxa La Muujin iyo waxa la Qarinba, wuuna ka Abaal Marin. Waa in Mu'miniintu ka Dhawraan Indhahooda Dayidda Xaaraanta ah, taasoo ah Daymada Haweenkood Daydo, iyo in layska Ilaaliyo Zinada iyo Xumaanta'Illeen Eebe waa Ogyahay waxa Lasamayne. Wataas Sharafta Islaamku iyo Nadaafadiisa iyo Aadaabtiisa, waxaana Meelo Badan ku sugnaaday Xaaraanimada Iska Galidda ama Fiirinta Guryaha Dadka, iyo Daawashada Haweenka'Fiirintooda iyo inay Tahay Leeb Ibliis iyo Billowga Xumaanta, Taasina waxay Waran ku Tahay kuwa iska Gala Guryaha Dadka Idam la'aan iyo Kuwa Iska Daawada Jidhka Haweenka. An-Nuur (27-30).**

---

31. Waxaad ku Dhahdaa (Haweenka) Mu'minaadka ah, (Xaqa Rumeeyey) Ha Laabeen Indhahooda hana Dhawreen Farjigooda Muujininna Quruxdooda wax Muuqda Mooye, Hana ku Dadeen Hagoogtooda dhuuntooda,yayna u Muujin Quruxdooda Ragooda Mooyee, iyo Aabayoowgood iyo Ninkooda Aabihiis, iyo Wiilashooda iyo Wiilasha Nimankooda iyo Walaalahood iyo Wiilasha Walaalahood, iyo Wiilasho (Gabdhahay) Walaalaha yihiin, iyo Haweenkooda (Muslimka ah) ama waxay Hanato Midigtoodu (Gacantoodu) ama kuwa Raaca een Dan Lahayn (Hawood u Lahayn) oo Ragga aha ama Caruurta aan Fiirsanayn Cawrada Haweenka, Yeyna kuna Garaacin Lugahooda (Dhulka) in la Ogaado waxay Qarin oo Quruxdooda ah, una Toobad keena (U Noqda) Xagga Eebe Dhammaan Mu'miniineey waxaad u Dhawdihiin Inaad Liibaantaane.

وَقُل لِّلْمُؤْمِنَاتِ يَغْضُضْنَ مِنْ أَبْصَارِهِنَّ وَيَحْفَظْنَ
فُرُوجَهُنَّ وَلَا يُبْدِينَ زِينَتَهُنَّ إِلَّا مَا ظَهَرَ
مِنْهَا وَلْيَضْرِبْنَ بِخُمُرِهِنَّ عَلَىٰ جُيُوبِهِنَّ وَلَا يُبْدِينَ
زِينَتَهُنَّ إِلَّا لِبُعُولَتِهِنَّ أَوْ آبَائِهِنَّ
أَوْ آبَاءِ بُعُولَتِهِنَّ أَوْ أَبْنَائِهِنَّ
أَوْ أَبْنَاءِ بُعُولَتِهِنَّ أَوْ إِخْوَانِهِنَّ
أَوْ بَنِي إِخْوَانِهِنَّ أَوْ بَنِي أَخَوَاتِهِنَّ أَوْ نِسَائِهِنَّ
أَوْ مَا مَلَكَتْ أَيْمَانُهُنَّ أَوِ التَّابِعِينَ غَيْرِ أُولِي
الْإِرْبَةِ مِنَ الرِّجَالِ أَوِ الطِّفْلِ الَّذِينَ لَمْ يَظْهَرُوا
عَلَىٰ عَوْرَاتِ النِّسَاءِ وَلَا يَضْرِبْنَ بِأَرْجُلِهِنَّ لِيُعْلَمَ
مَا يُخْفِينَ مِن زِينَتِهِنَّ وَتُوبُوا إِلَى اللَّهِ جَمِيعًا
أَيُّهَ الْمُؤْمِنُونَ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ ﴿٣١﴾

**Aayaddan waxay soo Degtay Mar Haweenku Iska Soo Galeen Guriga Haweeneey la Dhihi Jiray Asma Binti Mirthad iyagoo Banaan Laabta oyna Tidhi Xumaa Sidan, Waana Amar Eebe üu Faraayo Haweenka Muslimka ah Inay Falaan si ay uga Soocmaan Siday Jaahiliintu Falayeen oo ah Isqaawin iyo Muujinta Jidhka, waxayna Fari Aayadu inay Isdhawraan isna Asturaan Oyna isu Muujinnin Ragga Marka Laga Reebo Kuwa Aayadduu Taxday ee ah Nimanka iyo Qaraabada aan Guursankarin, iyo kuwaan Haweenka Danka Lahayn iyo Wiilasha Yar Yareen wax Eegayn iyo Haweenka Muslimka ah, waxa la Sheegina waa waxa Cawrada iyo Jidhka Hoose ka Soo Hadhay'Illeen Kaasi waa Ceebe. Miyeyse Habboontahay in Lays Qaawiyo oo LaguNoqdo Jaahiliyadii Hore wax ka Daran, iyadoo Cilmi La Sheegan, Wataas Aadaabta Islaamka'waana inay Is Dhawraan oo Is Ilaaliyaan Mu'miniintu Rag iyo Haweenba'Sharaftooda iyo Indhahooda iyo JIdhkoodana Xafitaan si ay u Helaan Naxariista Eebe iyo Wanaaggiisa. An-Nuur (31).**

32. U Guuriya Xaaslaawaha Idinka Mid ah iyo Kuwa Suuban oo Addoomadiinna ah (Rag iyo Haweenba) hadday Sabool Yihiin wuxuu ka Hodmin Eebe Fadligiisa, Eebana waa Waasac (Fadligiisu) Waana Oge.

وَأَنكِحُواْ ٱلۡأَيَٰمَىٰ مِنكُمۡ وَٱلصَّٰلِحِينَ مِنۡ عِبَادِكُمۡ
وَإِمَآئِكُمۡۚ إِن يَكُونُواْ فُقَرَآءَ يُغۡنِهِمُ ٱللَّهُ مِن فَضۡلِهِۦۗ
وَٱللَّهُ وَٰسِعٌ عَلِيمٞ ٣٢

33. Hase Dhawrsadeen Kuwaan Helayn (awood) Guur inta Eebe kaga Hodmin Fadligiisa, kuwa Dooni Inay Isfurtaan oo Hanatay Gacantiinnu Kitaabeeya (Ka Ogolaada) Haddaad ku Ogtihiin Khayr, wax ka Siiyana Xoolaha Eebe ee uu Idin Siiyey, hana ku Qasbina Gabdhihiinna (aad Hanataan) Zino Hadday Doonaan Dhawrsooni Idinkoo Dooni Sadka Nolosha Adduunyada, Ciddii Qasabta Eebe Qasabkaas ka Dib waa Dambi Dhaafe Naxariista.

وَلۡيَسۡتَعۡفِفِ ٱلَّذِينَ لَا يَجِدُونَ نِكَاحًا حَتَّىٰ يُغۡنِيَهُمُ ٱللَّهُ
مِن فَضۡلِهِۦۗ وَٱلَّذِينَ يَبۡتَغُونَ ٱلۡكِتَٰبَ مِمَّا مَلَكَتۡ
أَيۡمَٰنُكُمۡ فَكَاتِبُوهُمۡ إِنۡ عَلِمۡتُمۡ فِيهِمۡ خَيۡرٗاۖ وَءَاتُوهُم
مِّن مَّالِ ٱللَّهِ ٱلَّذِيٓ ءَاتَىٰكُمۡۚ وَلَا تُكۡرِهُواْ فَتَيَٰتِكُمۡ
عَلَى ٱلۡبِغَآءِ إِنۡ أَرَدۡنَ تَحَصُّنٗا لِّتَبۡتَغُواْ عَرَضَ ٱلۡحَيَوٰةِ
ٱلدُّنۡيَاۚ وَمَن يُكۡرِههُّنَّ فَإِنَّ ٱللَّهَ مِنۢ بَعۡدِ إِكۡرَٰهِهِنَّ
غَفُورٞ رَّحِيمٞ ٣٣

34. Waxaan idiin soo Dejinay Aayaad Cad Cad iyo Tusaale Kuwii Tagay ee Idinka Horreeyey iyo Waanada kuwa Dhawrsada.

وَلَقَدۡ أَنزَلۡنَآ إِلَيۡكُمۡ ءَايَٰتٖ مُّبَيِّنَٰتٖ وَمَثَلٗا مِّنَ ٱلَّذِينَ
خَلَوۡاْ مِن قَبۡلِكُمۡ وَمَوۡعِظَةٗ لِّلۡمُتَّقِينَ ٣٤

**Diinta Islaamku waa Diin Naxariis iyo Isu Kaalmayn, sida ka Muuqata Aayaddan Eebe ku Fari In Loo Guuriyo Dadka Guri la‘aanta ah Rag iyo Haweenba, lana Kaalmeeyo Dadka Dooni Inay ka hoos baxaan Gacanta iyo inay Is Dhawrto Ciddaan Karin Kharashka Guur inta Eebe ka Deeqi’iyo Inaan la Farin Haweenka iyo Gabdhaha Gacantooda ku Hoos jira Xumaan iyo Zino, Isagoo la Dooni dhalanteed Adduun, Eebase waa Dambi Dhaafe Ciddii u Toobad keenta, wuxuuna inoo Soo Dejiyay Aayaad Cad cad iyo Tusaale Dadkii hore iyo Waanada Ciddii Dhawrsata Taasina waxay ku Tusin in islaamku yahay Diin Caddaalad, Isu Kaalmayn, Nadaafo, Sharaf iyo Dhawrsooni, Islaamkuna Markuu u Yeedhi in La Xoreeyo Dadka Gacan ku Hoos jira oo ah Ruux Maxaad maleyn Kuwa Gaalada ah ee Addoonsada Dad’Haddana Qaylyi ama Islaamka Xoraynta Fari wax Ka Sheegi, waa Doqomo Indha la‘, oon Fikirayn, waxaase ka sii Xun kuwa u Durbaantumi Kuwaas.**
**Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Dhallin yarooy Ciddii Karta Kharash Guurka ha Guursato, Isaga Isha Laabid badane oo Farjiga Dhawrid Badane, Ciddaan Karinna waxaa Saaraan Soon si uu u fududeeyo Himada. inse laga Tago Guurka isagoo la dano Sheegan, haddana wax la qasto oo la Meeraysto Taasi Islaamku ma Ogala mana banaana. An-Nuur (32-34).**

---

35. Eebe waa Nuuriyaha Samooyinka iyo Dhulka,Nuurkiisu wuxuu la mid yahay Daaqad Misbaax ku Jiro Misbaaxuna ku Jiro Dhalo, Dhaladana aad Mooddo Xiddig Ifi lagana Huriyey Geed la Barakeeyay oo ah Zaytuun (Saliidd leh) oon bari iyo Galbeed midna

۞ ٱللَّهُ نُورُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِۚ مَثَلُ نُورِهِۦ
كَمِشۡكَوٰةٖ فِيهَا مِصۡبَاحٌۖ ٱلۡمِصۡبَاحُ فِي زُجَاجَةٍۖ
ٱلزُّجَاجَةُ كَأَنَّهَا كَوۡكَبٞ دُرِّيّٞ يُوقَدُ مِن شَجَرَةٖ
مُّبَٰرَكَةٖ زَيۡتُونَةٖ لَّا شَرۡقِيَّةٖ وَلَا غَرۡبِيَّةٖ يَكَادُ زَيۡتُهَا

ahayn, waxayna u Dhawdahay Salii-deedu inay iska Ifto Yuuna Taabaninba Dabe, waa Nuur lagu kordhiyay Nuur, wuxuuna ku Hanuuniyaa Eebe Nuurkiisa Cidduu Doono, wuxuuna u Yeelaa Eebe Dadka Tusaale, Eebana wax kasta waa Ogyahay.

يُضِيٓءُ وَلَوْ لَمْ تَمْسَسْهُ نَارٌ نُّورٌ عَلَىٰ نُورٍ يَهْدِى
ٱللَّهُ لِنُورِهِۦ مَن يَشَآءُ وَيَضْرِبُ ٱللَّهُ ٱلْأَمْثَٰلَ
لِلنَّاسِ وَٱللَّهُ بِكُلِّ شَىْءٍ عَلِيمٌ ﴿٣٥﴾

36. (Kaasoo ah) Guryo (Masaajidda) uu idmay Eebe in la Koryeelo Laguna Xuso Dhexdeeda Magaciisa, waxaana ugu Tasbiixsada Dhexdeeda Aroor iyo Galabba.

فِى بُيُوتٍ أَذِنَ ٱللَّهُ أَن تُرْفَعَ وَيُذْكَرَ فِيهَا
ٱسْمُهُۥ يُسَبِّحُ لَهُۥ فِيهَا بِٱلْغُدُوِّ وَٱلْءَاصَالِ ﴿٣٦﴾

37. Rag ayna ka Shuqlinayn Ganacsi iyo Gadasho Xuska Eebe, Oogidda Salaadda iyo Bixinta Zakada kana Cabsan Maalin oy Gagadoomi Dhexdeeda Quluubta iyo Aragguba.

رِجَالٌ لَّا تُلْهِيهِمْ تِجَٰرَةٌ وَلَا بَيْعٌ عَن ذِكْرِ ٱللَّهِ وَإِقَامِ
ٱلصَّلَوٰةِ وَإِيتَآءِ ٱلزَّكَوٰةِ يَخَافُونَ يَوْمًا تَتَقَلَّبُ فِيهِ
ٱلْقُلُوبُ وَٱلْأَبْصَٰرُ ﴿٣٧﴾

38. Inuu ka Abaal Mariyo Eebe Wanaagay Faleen una Kordhiyo Fadligiisa, Eebana wuu Arzuqaa Cidduu Doono Xisaab la‘aan.

لِيَجْزِيَهُمُ ٱللَّهُ أَحْسَنَ مَا عَمِلُوا۟ وَيَزِيدَهُم مِّن فَضْلِهِۦ
وَٱللَّهُ يَرْزُقُ مَن يَشَآءُ بِغَيْرِ حِسَابٍ ﴿٣٨﴾

Nuurka Eebe Waynaaye yey la Ifaan Samooyinka iyo dhulka, wuxuuna ku Hanuuniyaa Nuurkaas Cidduu Doono, Waana Tusaale Eebe Qadaray. Xadiithna waxaa ku sugnaaday: Waxaan Magan gali Nuurka Wajigaaga oy u Iftay Mogdiyadu (Eebow). Masaajidda Eebe ee uu Idmay in La Sharrifo oo la Koryeelana lagu Xuso Magaciisa Waqti kasta waxaa ku Dadaala Dad ayna ka Shuqlinin Xusidda Eebe, Salaadda, iyo Zakada Ganacsi iyo Gadasho Midna, iyagoo ka Cabsan Maalin Qalbiga iyo Aragu Gagadoomo, Qiyaamada, iyagoo Rajayn in Eebe Wanaag ku abaal mariyo, Masaajidda Xaalkooduna waa Waynyahay waana Meelaha Nuurka Islaamku ka Billowday'Eebana Ugu Jecelyahay, waana in la Dhiso, Lana Camiro, waxna lagu Barto Cibaadada kale ka Sokow, waxaana ku soo Arooray Fadliga Cidda Dhista ama Camirta ama u Dadaasha Wanaagyo Badan, waxaana ka Mid ah: Ruuxii Dhisa Masaajid Isagoo Dar Eebe u dhisi Wuxuu Eebe Uga Dhisaa Janada Isagoo Kale. Caa‘ishana Waxay Tidhi: Wuxuu Na faray Rasuulkii Eebe (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) in Laga Dhiso Masaajidda Xaafadaha lana Nadiifiyo, lana Udgiyo. An-Nuur (35-38).

---

39. Kuwii Gaaloobay Camalkoodu wuxuu la Midyahay Dhalanteed Dhul Siman (Ka Muuqda) oos u Malayn kan Oomani biyo Markuu Yimaadana uuna ka Helayn waxba, oo uu ka heli Eebe (Abaal marintiisa) Agtiisa una Oofiyey Xisaabtiisa, Eebana way Deg degtaa Xisaabtiisu.

وَٱلَّذِينَ كَفَرُوٓا۟ أَعْمَٰلُهُمْ كَسَرَابٍۭ بِقِيعَةٍ يَحْسَبُهُ
ٱلظَّمْـَٔانُ مَآءً حَتَّىٰٓ إِذَا جَآءَهُۥ لَمْ يَجِدْهُ شَيْـًٔا
وَوَجَدَ ٱللَّهَ عِندَهُۥ فَوَفَّىٰهُ حِسَابَهُۥ وَٱللَّهُ
سَرِيعُ ٱلْحِسَابِ ﴿٣٩﴾

40. Ama wuxuu la Midyahay Mugdiyo Bad Dhexdeed ah oos Dabooli Hir

أَوْ كَظُلُمَٰتٍ فِى بَحْرٍ لُّجِّىٍّ يَغْشَىٰهُ مَوْجٌ مِّن فَوْقِهِۦ

Korkiisana yahay Hir, Korkiisana Tahay Daruur, waa Mugdiyo Qaarkood Qaar ka Sarreeyo Hadduu Bixiyo Gacantiisana uma Dhawa inuu Arko, Ruuxaan Eebe u yeelin Nuur malaha Nuur.

مَوْجٌ مِّن فَوْقِهِۦ سَحَابٌۚ ظُلُمَٰتٌۢ بَعْضُهَا فَوْقَ بَعْضٍ إِذَآ أَخْرَجَ يَدَهُۥ لَمْ يَكَدْ يَرَىٰهَاۗ وَمَن لَّمْ يَجْعَلِ ٱللَّهُ لَهُۥ نُورًا فَمَا لَهُۥ مِن نُّورٍ ﴿٤٠﴾

41. Miyaadan Ogayn in Eebe u Tasbiixsado waxa ku Sugan Samooyinka iyo Dhulka iyo Shimbiraha oo (Fidsan) Safan mid kasta wuu Ogyahay Salaaddiisa iyo Tasbiixdiisa, Eebana waa Ogyahay waxay Fali.

أَلَمْ تَرَ أَنَّ ٱللَّهَ يُسَبِّحُ لَهُۥ مَن فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَٱلطَّيْرُ صَٰٓفَّٰتٍۖ كُلٌّ قَدْ عَلِمَ صَلَاتَهُۥ وَتَسْبِيحَهُۥۗ وَٱللَّهُ عَلِيمٌۢ بِمَا يَفْعَلُونَ ﴿٤١﴾

42. Eebe waxaa u Sugnaaday Xukunka Samooyinka iyo dhulka Xagga Eebaana loo Ahaan.

وَلِلَّهِ مُلْكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِۖ وَإِلَى ٱللَّهِ ٱلْمَصِيرُ ﴿٤٢﴾

Markay Aayadaha Hore Ka warrameen Nuurka Eebe iyo Iimaanka iyo Jidka Wanaagga ee uu ku Hanuuniyey Mu‘miniinta, iyo Masaajidda, iyo in kuwayna Shuqlinin Adduunyadu ay ku cibaadaystaan Sharifaanna yaa Halkan lagu Sheegay in Camalka Gaaladu la Midyahay Dhalanteed ooman Biyo Mooday meel Cidla’ah oo Oomana ah, Markuu Dhintana uu La kulmi Eebe una Oofin Abaalkiisa, Illeen Mugdiyo Baadiyuu ku Sugnaaye, Nuurna Eebe uma yeeline, Eebana Kuwaas waa ka Kaaftoonyahay’Illeen waxaa Wayneeya oo Caabuda waxa Cirka iyo dhulka ku Sugan, Xaataa Shinbiraha Duuli, Hawada Sare, Isagoo Eebe wax walba og, wax walbana Xaggiisa u Ahaan, waxaa Sugnaaday in Yuhuud lagu Dhihi Qiyaamada Maxaad Caabudayseen oy Dhihi, Waxaan Caabudaynay Cuzayr Ibnu Ilaah, markaasaa lagu Dhihi Beenbaad Sheegteen, Eebe Ilmo ma Yeelanin, ee Maxaad Rabtaan, waxayna Odhan Eebow waannu Oonaye ee Na Waraabi Markaasaa la Dhihi Miyeydaan Arkayn, Naartaana ugu Muuqata Dhalanteed oo Qaarkood Qaar Buuran Markaasay Isku Tuurayaan. Eebaan ka Magan gallay, Halkaasayna Jiraan Liibaan iyo Khasaare, Liibaanta Mu‘miniinta iyo Khasaaraha Gaalada, Waana Arrin Mudan u Darbasho. An-Nuur (39-42).

---

43. Miyeydaan Arkayn in Eebe Keeeyo Daruuro Markaas Isudumo Kana Yeelo Mid is dulSaaran ood aragto Roobkoo ka Soo Bixi Dhexdiisa wuxuuna ka soo Dejiyaa (Eebe) Samada Buuro Qabow ah (Thalaj) wuxuuna Gaadhsiiyaa Cidduu Doono, wuxuuna u Dhawyahay Nuurka Hilaaciisu inuu la Tago Aragga.

أَلَمْ تَرَ أَنَّ ٱللَّهَ يُزْجِى سَحَابًا ثُمَّ يُؤَلِّفُ بَيْنَهُۥ ثُمَّ يَجْعَلُهُۥ رُكَامًا فَتَرَى ٱلْوَدْقَ يَخْرُجُ مِنْ خِلَٰلِهِۦ وَيُنَزِّلُ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مِن جِبَالٍ فِيهَا مِنۢ بَرَدٍ فَيُصِيبُ بِهِۦ مَن يَشَآءُ وَيَصْرِفُهُۥ عَن مَّن يَشَآءُۖ يَكَادُ سَنَا بَرْقِهِۦ يَذْهَبُ بِٱلْأَبْصَٰرِ ﴿٤٣﴾

44. Wuu Gagadiyaa Eebe Habeenka iyo Dharaarta, Arrintaasna waano Qaadasho yaa ugu Sugan kuwa Aragga leh (Caqliga leh).

يُقَلِّبُ ٱللَّهُ ٱلَّيْلَ وَٱلنَّهَارَۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَعِبْرَةً لِّأُوْلِى ٱلْأَبْصَٰرِ ﴿٤٤﴾

45. Eebaa ka Abuuray wax Kastoo socda (oo nool) Biyo waxaana ka Mid

وَٱللَّهُ خَلَقَ كُلَّ دَآبَّةٍ مِّن مَّآءٍۖ فَمِنْهُم مَّن يَمْشِى عَلَىٰ بَطْنِهِۦ

وَمِنْهُم مَّن يَمْشِى عَلَىٰ رِجْلَيْنِ وَمِنْهُم مَّن يَمْشِى عَلَىٰٓ أَرْبَعٍ
يَخْلُقُ ٱللَّهُ مَا يَشَآءُ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿٤٥﴾

ah mid ku Socda Calooshiisa, waxaana ka mid ah mid ku Socda Labo Lugood, Waxaana ka mid ah mid ku Socda Afar, wuxuu Abuuraa Eebe wuxuu Doono, Eebana wax kasta waa Karaa.

لَّقَدْ أَنزَلْنَآ ءَايَـٰتٍ مُّبَيِّنَـٰتٍ ۚ وَٱللَّهُ يَهْدِى مَن يَشَآءُ
إِلَىٰ صِرَٰطٍ مُّسْتَقِيمٍ ﴿٤٦﴾

46. Waxaan soo Dejinay Aayaad Cad Cad, Eebana wuxuu ku Hanuuniyaa Cidduu Doono Jid Toosan.

Roobku wuxuu ku jiraa Awoodda Eebe, Isagaana Kulmiya Daruuraha kana Keena Roobka Meejuu Doonana ku Da‘siiya, Habeenka iyo Maalintana Eebaa ku Tasarrufa inay ku Waana Qaataan kuwa Wax Garadka ah, wax kasta oo Nafley ahna oo Socda Eebaa Biyo ka Abuuray, mid Bog ku Socda, mid Labo ku Socda iyo Mid Afar ku Socdaba, wuxuu Doonana wuu Abuuraa, wax walbana waa Karaa, wuxuuna Soo Dejiyay Aayaad Cad Cad, Cidduu doonana wuxuu ku Toosiyaa Jidka Toosan. Taasina waxay Sugi In Eebe wax walba Ogyahay'Awoodana Leeyahay, Biyahana laga Abuuray Naflayda, kalana Duway Socodkooda iyo Abuurkooda, wuxuu Doona uu Abuuri, waxayna Aamusiin Gaalada, Mulxidiinta, Jaahiliinta iyo Kuwa Rumeeya oo Raaca Kuwaas. An-Nuur (43-46).

---

وَيَقُولُونَ ءَامَنَّا بِٱللَّهِ وَبِٱلرَّسُولِ وَأَطَعْنَا ثُمَّ يَتَوَلَّىٰ
فَرِيقٌ مِّنْهُم مِّنۢ بَعْدِ ذَٰلِكَ ۚ وَمَآ أُو۟لَـٰٓئِكَ
بِٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿٤٧﴾

47. Waxay Dhihi (Munaafiqiintu) Waxaan rumeeynay Eebe iyo Rasuulka waana Adeecnay markaasaa waxaa Jeedsada Kooxo ka Mid ah Intaas ka Dib, Kuwaasi ma aha Mu‘miniin.

وَإِذَا دُعُوٓا۟ إِلَى ٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦ لِيَحْكُمَ بَيْنَهُمْ إِذَا فَرِيقٌ
مِّنْهُم مُّعْرِضُونَ ﴿٤٨﴾

48. Marka Loogu Yeedho Eebe iyo Rasuulkiisa inuu kala Xukumo Dhexdooda waxaa soo Baxa Koox ka Mid ah oo Jeedsan.

وَإِن يَكُن لَّهُمُ ٱلْحَقُّ يَأْتُوٓا۟ إِلَيْهِ مُذْعِنِينَ ﴿٤٩﴾

49. Hadduu Xaqu iyaga U sugnaado way u Yimaadaan iyagoo Adeeci.

أَفِى قُلُوبِهِم مَّرَضٌ أَمِ ٱرْتَابُوٓا۟ أَمْ يَخَافُونَ أَن يَحِيفَ ٱللَّهُ
عَلَيْهِمْ وَرَسُولُهُۥ ۚ بَلْ أُو۟لَـٰٓئِكَ هُمُ ٱلظَّـٰلِمُونَ ﴿٥٠﴾

50. Ma Qalbigay ka Bukaan mise way Shakiyeen mise waxay ka Cabsan in Eebe ku Jawr falo iyo Rasuulkiisu, saas ma aha ee kuwaasu waa kuwo Daalimiin ah.

إِنَّمَا كَانَ قَوْلَ ٱلْمُؤْمِنِينَ إِذَا دُعُوٓا۟ إِلَى ٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦ
لِيَحْكُمَ بَيْنَهُمْ أَن يَقُولُوا۟ سَمِعْنَا وَأَطَعْنَا ۚ وَأُو۟لَـٰٓئِكَ
هُمُ ٱلْمُفْلِحُونَ ﴿٥١﴾

51. Mu‘minka Hadalkiisu marka loogu yeedho Eebe iyo Rasuulkiisu inuu kala Xukumo Dhexdooda waa uun Inay Dhahaan waan Maqallay Waana Adeecnay Kuwaasuna waa uun kuwa Liibaanay.

52. Ciddii Adeecda Eebe iyo Rasuulkiisa oo Cabsata kana Dhawrsata Kuwaasi waa uun kuwa Liibaanay.

وَمَن يُطِعِ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ وَيَخۡشَ ٱللَّهَ وَيَتَّقۡهِ
فَأُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلۡفَآئِزُونَ ٥٢

**Munaafiqiintu Had iyo Jeer waa Col kugu Dhex jira iyo Dhiqle Muslimiinta Xasilka u diida, Afkana waxay ka Sheegaan inay Xaqa Rumeeyeen, haddana way ka Jeedsan Xaqa, marka loogu yeedho in Xaqa lagu kala Xukumo way Jeedsan, Hadday u Fili in Iyaga loo Xukumina way Yimaadaan iyagoo Rumeysan oo Maqli Taasna waxaa ugu Wacan inay Qalbiga ka bukaan shakina kaga Jiro Caddaaladda Eebe iyo Rasuulkiisa waana Daalimiin, Mu‘miniintuse way Maqli oy Adeeci marka loogu Yeedho Xukunka Eebe iyo Rasuulkiisa, waana kuwa Liibaanay ee Adeecay Eebe iyo Rasuulka, Eebana ka Cabsada kana Dhawrsada, wana kaas Xumida Diidada Sharciga Eebe iyo u hogaansankiisa, wax Xukunka Eebe la mid ah ama ku Dhawna ma Jiro, waana in Lagu Dhaqmo. An-Nuur (47-52).**

---

53. Waxay ugu Dhaarteen Eebe (Munaafiqiinta) Dhaar Daran inay u Baxaan (Jahaad) waxaad Dhahdaa ha Dhaaranina Addeecid la Yaqaan (ha Ahaado Xaalkiinnu) Eebana waa Ogyahay waxaad Falaysaan.

۞وَأَقۡسَمُواْ بِٱللَّهِ جَهۡدَ أَيۡمَٰنِهِمۡ لَئِنۡ أَمَرۡتَهُمۡ
لَيَخۡرُجُنَّۖ قُل لَّا تُقۡسِمُواْۖ طَاعَةٞ مَّعۡرُوفَةٌۚ
إِنَّ ٱللَّهَ خَبِيرُۢ بِمَا تَعۡمَلُونَ ٥٣

54. Waxaad Dhahdaa Addeeca Eebe oo Addeeca Rasuulka Haddaad Jeedsataanna waxaa uun Korkiisa ah (Nabiga) waxa la Saaray (la Faray) idinkana waxa Korkiinna ah waxa laydin Saaray (Xaq raacid) haddaad Addeecdaan (Nabiga) waad Hanuunaysaan, Rasuulkana ma Saarra waxaan Gaadhsiin Cad ahayn.

قُلۡ أَطِيعُواْ ٱللَّهَ وَأَطِيعُواْ ٱلرَّسُولَۖ فَإِن تَوَلَّوۡاْ فَإِنَّمَا
عَلَيۡهِ مَا حُمِّلَ وَعَلَيۡكُم مَّا حُمِّلۡتُمۡۖ وَإِن تُطِيعُوهُ
تَهۡتَدُواْۚ وَمَا عَلَى ٱلرَّسُولِ إِلَّا ٱلۡبَلَٰغُ ٱلۡمُبِينُ ٥٤

55. Wuxuu u Yaboohay Eebe kuwa Rumeeyay Xaqa oo Camal Fiican Falay inuu u Reebo Dhulka siduu ugu Reebay kuwii ka Horreeyay, wuxuuna Makanin Diintooda uu uga Raalli Noqday wuxuuna ugu Badali Cabsidooda ka Dib Nabadgalyo, wayna I cabudi Ilamana Wadaajiyaan waxba,

وَعَدَ ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ مِنكُمۡ وَعَمِلُواْ ٱلصَّٰلِحَٰتِ
لَيَسۡتَخۡلِفَنَّهُمۡ فِي ٱلۡأَرۡضِ كَمَا ٱسۡتَخۡلَفَ
ٱلَّذِينَ مِن قَبۡلِهِمۡ وَلَيُمَكِّنَنَّ لَهُمۡ دِينَهُمُ ٱلَّذِي
ٱرۡتَضَىٰ لَهُمۡ وَلَيُبَدِّلَنَّهُم مِّنۢ بَعۡدِ خَوۡفِهِمۡ أَمۡنٗاۚ
يَعۡبُدُونَنِي لَا يُشۡرِكُونَ بِي شَيۡـٔٗاۚ وَمَن كَفَرَ

Ciddii Gaalowda intaas Ka Dibna ku-waasu waa uun Faasiqiin.

بَعْدَ ذَٰلِكَ فَأُولَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْفَٰسِقُونَ ﴿٥٥﴾

Munaafiqiin wax badan yey Been ku Dhaartaan, waxaase u Wanaagsan Raacid Xaq iyo Addeecid, Cid walbana waxaa laga Rabaa waxa la Saaray, Aayadda kale waxay ka Hadli in Eebe u Yaboohay Mu'miniinta inay Dhulka U Hadhi oy Xukumi Hadday Xaqa Rumeeyaan, Wanaagna Falaan, Markaasuu Makanin Diintooda uu ka Raalli Noqday Cabsidana Ammaan Ugu Badali, Eebe kaliyana Ay Caabudi, Wuuna U Rumoobay Mu'miniintii Hore Yabooha Eebe, markay Xaqa Raaceen oo Sharciga Eebe Isku Dhaqeen, Ciddii Saas Fashana wuu u Gargaari Eebe Waqti kasta. Waxaa laga Wariyey Cadi Binu Xaatim inuu Nabiga (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa hayeelee) U yimid uuna ku Yidhi: Ma taqaan Xiiro, oo yidhi ma aqaan waanse maqlay, oo Nabigu Yidhi «Eebaan ku Dhaartaye wuu Taamyeeli Eebe Diintan inta Haweenaydu ka Baxdo Xiiro oy ka Dhawaafto Baydka Iyagoon Cidna Hoos Galin, waxaana la Furan Kinsiga Kisre Binu-Hurmus markaasaan Idhi Kisre Binu Hurmus markaasuu yidhi Haa Kisre Binu Hurmus wuxuu Yidhi Cadi wataas Haweenaydu iska Dhawaafi Baydka IyadooXiira ka Soo Tagtay Nabadgalyo,waxaanan ka Mid ahaa Dadkii wax ka Furtay Kansigii Kisre Binu Hurmus'Wallee Tii Seddexaad ee Nabigu Sheegayna waa la Heli. Waxaa kale oo sugnaaday: Ugu Bishaaree Umaddan Sharaf, Sarreyn, Diin, Gargaar iyo Makanid Dhulka, Markay Toosaan. An-Nuur (53-55).

---

56. Ooga Salaadda, Bixiya Zakada oo Addeeca Rasuulka waxaad Mudantihiin in laydiin Naxariistee.

وَأَقِيمُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ وَءَاتُوا۟ ٱلزَّكَوٰةَ وَأَطِيعُوا۟ ٱلرَّسُولَ
لَعَلَّكُمْ تُرْحَمُونَ ﴿٥٦﴾

57. Hana Umalayn Kuwa Gaaloobay inay ku Daalin (Eebe) Dhulka, Guryahooduna Waa Naar waxaana u Xun Meel Loo Ahaado (Naar).

لَا تَحْسَبَنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ مُعْجِزِينَ فِى ٱلْأَرْضِ ۚ
وَمَأْوَىٰهُمُ ٱلنَّارُ ۖ وَلَبِئْسَ ٱلْمَصِيرُ ﴿٥٧﴾

58. Kuwa Xaqa Rumeeyow Haydin Idan Warsadeen kuway Hanatay Gacantiinnu, iyo Kuwaan Qaan Gaadhin oo Idinka Mid ah Saddex Jeer, Salaadda Subax ka Hor iyo Markaad iska Dhigtaan Dharka Duhurkii, iyo Salaadda Cishaha ka Dib, waa Seddex Waqti oo Cawro ah «la Nasto», ma aha Korkiinna iyo korkooda midna Dhib «ma Saarra» intaas ka Dib, way idin kor Socdaan (Shaqeeyaan) Qaarkiinna Qaarbuu ka Ahaaday, saasuuna idiinku Caddayn Eebe Aayaadkiisa Eebana waa Oge Falsan.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لِيَسْتَـْٔذِنكُمُ ٱلَّذِينَ مَلَكَتْ
أَيْمَٰنُكُمْ وَٱلَّذِينَ لَمْ يَبْلُغُوا۟ ٱلْحُلُمَ مِنكُمْ ثَلَٰثَ مَرَّٰتٍ ۚ
مِّن قَبْلِ صَلَوٰةِ ٱلْفَجْرِ وَحِينَ تَضَعُونَ ثِيَابَكُم مِّنَ ٱلظَّهِيرَةِ
وَمِنۢ بَعْدِ صَلَوٰةِ ٱلْعِشَآءِ ۚ ثَلَٰثُ عَوْرَٰتٍ لَّكُمْ ۚ
لَيْسَ عَلَيْكُمْ وَلَا عَلَيْهِمْ جُنَاحٌۢ بَعْدَهُنَّ ۚ
طَوَّٰفُونَ عَلَيْكُم بَعْضُكُمْ عَلَىٰ بَعْضٍ ۚ كَذَٰلِكَ
يُبَيِّنُ ٱللَّهُ لَكُمُ ٱلْءَايَٰتِ ۗ وَٱللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴿٥٨﴾

59. markay Carruurtiinnu Qaangaadhana haydin Idan warsadeen siday idiin Idamwarsadeen kuwii ka Horreeyay, saasuuna idiinku Caddayn Eebe Aayaadkiisa, Eebana waa Oge Falsan.

وَإِذَا بَلَغَ ٱلْأَطْفَٰلُ مِنكُمُ ٱلْحُلُمَ فَلْيَسْتَـْٔذِنُوا۟
كَمَا ٱسْتَـْٔذَنَ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ ۚ كَذَٰلِكَ يُبَيِّنُ
ٱللَّهُ لَكُمْ ءَايَٰتِهِۦ ۗ وَٱللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴿٥٩﴾

60. Kuwa ka Fadhiistay (Ka quustay dhalmada) oo Haweenka ah oon guur Rajaynayn Korkooda Dhib (Dambi) ma Saarra inay iska Dhigaan Dharkooda (Iska Fududeeyaan) iyagoon ismuujinayn Qurux, Inay Dhawrsadaan yaase u Khayr Roon Eebana waa Maqle Og.

وَٱلْقَوَٰعِدُ مِنَ ٱلنِّسَآءِ ٱلَّٰتِى لَا يَرْجُونَ نِكَاحًا
فَلَيْسَ عَلَيْهِنَّ جُنَاحٌ أَن يَضَعْنَ
ثِيَابَهُنَّ غَيْرَ مُتَبَرِّجَٰتٍۭ بِزِينَةٍ
وَأَن يَسْتَعْفِفْنَ خَيْرٌ لَّهُنَّ وَٱللَّهُ
سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿٦٠﴾

**Oogidda Salaadda, Bixinta Zakada, iyo Addeecidda Rasuulka waa Sababaha Naxariista, wax Eebe Daalinna ma Jiro, Gaalana wuxuu ku Abaal Marin Naar. Aayadaha kale waxay ka warrami in Guryaha Galiddooda la Dhawro Gaar ahaan Saddex Waqti oo cid kasta laga rabo inay idan warsadaan, Xataa Dadka Gacantooda ku Hoos Nool, Carruurtuna mar hadday Qaangaadho waa inay Idam warsadaan. Haweenka Duqoobayna Hadday Dharka iska Fududeeyaan wax ma saarra haddayna Cawro Faydayn ama Isqurxinayn, waxaase Fiican Is Asturka. An-Nuur (56-60).**

---

61. Ma Saarra Indhoole Dhib, Lugoolana Dhib ma Saarra, Mid Bukana Dhib Ma Saarra, Naftiinnana Dhib ma Saarra Inaad wax ka Cuntaan Guryihiinna ama Guryaha Aabayaalkiin, ama Guryaha Hooyooyinkiin, ama Guryaha Walaalihiin, ama Guryaha Walaashiin, ama Guryaha Adeeradiin, ama Guryaha Eeddooyinkiin, ama Guryaha Abtiyadiin, ama Guryaha habaryarihiin, ama Guryahaad Hanataan Furihiisa, ama Guryaha Saaxiibahiin, Dhibna Idinma Saarra Inaad wax Cuntaan Idinkoo Kooxa ah ama kala Tagsan, markaad Gashaan Guryana Salaama Naftiinna, Salaan ka Ahaatay Eebe Xagiisa oo la Barakeeyey oo Fiican, Saasuuna idiinku Caddayn Eebe Aayaadka Inaad wax kastaan.

لَّيْسَ عَلَى ٱلْأَعْمَىٰ حَرَجٌ وَلَا عَلَى ٱلْأَعْرَجِ حَرَجٌ
وَلَا عَلَى ٱلْمَرِيضِ حَرَجٌ وَلَا عَلَىٰٓ أَنفُسِكُمْ
أَن تَأْكُلُوا۟ مِنۢ بُيُوتِكُمْ أَوْ بُيُوتِ ءَابَآئِكُمْ
أَوْ بُيُوتِ أُمَّهَٰتِكُمْ أَوْ بُيُوتِ إِخْوَٰنِكُمْ
أَوْ بُيُوتِ أَخَوَٰتِكُمْ أَوْ بُيُوتِ أَعْمَٰمِكُمْ
أَوْ بُيُوتِ عَمَّٰتِكُمْ أَوْ بُيُوتِ أَخْوَٰلِكُمْ
أَوْ بُيُوتِ خَٰلَٰتِكُمْ أَوْ مَا مَلَكْتُم
مَّفَاتِحَهُۥٓ أَوْ صَدِيقِكُمْ لَيْسَ عَلَيْكُمْ
جُنَاحٌ أَن تَأْكُلُوا۟ جَمِيعًا أَوْ أَشْتَاتًا فَإِذَا
دَخَلْتُم بُيُوتًا فَسَلِّمُوا۟ عَلَىٰٓ أَنفُسِكُمْ تَحِيَّةً
مِّنْ عِندِ ٱللَّهِ مُبَٰرَكَةً طَيِّبَةً
كَذَٰلِكَ يُبَيِّنُ ٱللَّهُ لَكُمُ ٱلْءَايَٰتِ
لَعَلَّكُمْ تَعْقِلُونَ ﴿٦١﴾

62. Mu'miniintu Waa Uun kuwa Rumeeyey Eebe iyo Rasuulkiisa,markay la Joogaan Amar kulmiyey Dartiis aan Tagin intay ka Idan Warsadaan, kuwa Idan warsada kuwaasu waa kuwa Rumeeyey Eebe iyo Rasuulkiisa, ee

إِنَّمَا ٱلْمُؤْمِنُونَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ بِٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦ
وَإِذَا كَانُوا۟ مَعَهُۥ عَلَىٰٓ أَمْرٍ جَامِعٍ لَّمْ يَذْهَبُوا۟
حَتَّىٰ يَسْتَـْٔذِنُوهُ إِنَّ ٱلَّذِينَ يَسْتَـْٔذِنُونَكَ أُو۟لَٰٓئِكَ

hadday kuu Idan warsadaan Danahooda Qaarkood u Idan Ciddaad Doonto oo ka Mid ah una Dambi Dhaafwarso Eebe, Ilaahay waa Dambi Dhaafe Naxariistee.

الَّذِينَ يُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَرَسُولِهِۦ ۚ فَإِذَا اسْتَأْذَنُوكَ
لِبَعْضِ شَأْنِهِمْ فَأْذَن لِّمَن شِئْتَ مِنْهُمْ
وَاسْتَغْفِرْ لَهُمُ اللَّهَ ۚ إِنَّ اللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٦٢﴾

Aayadahanna waxay ka Warrami Aadaabo Kale iyo inay Bannaantahay in wax lala Cuno Dadka Naafada ah iyo kuwa buka, waxna lagu Cuno Guryaha Qaraabada iyo Saaxiibada iyo Kuwaad Hanataan Furahoodaba, sidoo kale in Koox Koox wax loo Cuno ama kali kali iyo in laysa Salaamo marka la Gali Guryaha, waxaa soo Dhanna waa wax Eebe u Caddayn si ay u Ogaadaan, Taasina waxay ku Tusin sida Diinta Islaamku wax walba oo Dani ku Jirto u Caddaysay, Aayadda kalana waxay Caddayn inay Ahaayeen Mu‘miniintii Dhabta ahaa kuwaan ka Tagin Kulanka Nabiga Iyagoon Idan warsan, Nabiguna wuu idmi Jiray Cidday la Noqoto, Taasina waxay Muujin in laga Murgo Danaha Muslimiinta oon lana Ganta Furin ee la Dhawro isku Xidhnaantooda iyo Danahooda. An-Nuur (61-62).

---

63. Ha ka Yeelina u Yeedhidda Rasuulka sida U Yeedhidda Qaarkiin qaar, Eebe wuu ogyahay kuwa Dusi iyagoo Gabban,(Fadhiga Nabiga)ha ka Digtoonaadeen kuwa Khilaafi Amarka Nabiga inay ku Dhacdo Fidmo (Masiibo) ama ku Dhoco Cadaab Daran.

لَّا تَجْعَلُوا دُعَاءَ الرَّسُولِ بَيْنَكُمْ كَدُعَاءِ
بَعْضِكُم بَعْضًا ۚ قَدْ يَعْلَمُ اللَّهُ الَّذِينَ
يَتَسَلَّلُونَ مِنكُمْ لِوَاذًا ۚ فَلْيَحْذَرِ الَّذِينَ يُخَالِفُونَ
عَنْ أَمْرِهِۦٓ أَن تُصِيبَهُمْ فِتْنَةٌ أَوْ يُصِيبَهُمْ
عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٦٣﴾

64. Eebaa iska Leh waxa ku Sugan Samooyinka iyo Dhulka,waana Ogyahay Waxaad ku Sugantihiin, iyo Maalinta loo Celin Xaggiisa,oo uga Warami waxay Camal faleen, Eebana wax kasta waa Ogyahay.

أَلَآ إِنَّ لِلَّهِ مَا فِي السَّمَٰوَٰتِ وَالْأَرْضِ ۖ قَدْ يَعْلَمُ
مَآ أَنتُمْ عَلَيْهِ وَيَوْمَ يُرْجَعُونَ إِلَيْهِ فَيُنَبِّئُهُم
بِمَا عَمِلُوا ۗ وَاللَّهُ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمٌۢ ﴿٦٤﴾

Ibnu Cabbaas wuxuu Sheegay in Asaxaabtii ay nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ugu Yeedhi Jireen si Caadi ah oo Magaciisa ah markaasaa Eeba faray inay Qadariyaan oo ugu Yeedhaan si Haybad leh, Eebana waa Ogyahay Munaafiqiinta ka Dusi Jiray Fadhiga Nabiga, Dadkuna haka Digtoonaadeen Khilaafka Amarka Nabiga, Taasoo Fidmo iyo dhib ka Dhalan ama Cadaab Daran, Eebana waxaa u Sugnaaday Xukunka iyo Awoodda Khalqiga,wuuna Ogyahay waxay ku sugnaan Adduun iyo Aakhiraba, wuuna Abaal marin.
Aayadduna waxay uga Digi Dadka Khilaafka Nabiga iyo inaan lala Imaan wuxuusan Idmin. Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi : Ruuxii fala Camal aan ahayn Amarkanaga waa lagu Celin.
Suuraddanna waa Suurad wayn oo ka Warranta Aadaab Wayn, sida Ilaalinta Carrabka, iska Ilaalinta Zinada, Dhawridda Sharafta Muslimiinta iyo Dadka, Dhawridda Galidda Guryaha Dadka, Isa Salaamidda, Indha Laabashada Ragga iyo Haweenka, Is asturidda Haweenka iyo Ilaalintooda Sharaftooda, Qiimaha Islaamka iyo Iimaanka, Awoodda Eebe, Caddaaladda iyo Raacidda Xaqa, in Muslimiinta Toosan U hadhi Dhulka, Dhawridda Danaha iyo Fadhiga Muslimiinta, Ixtiraamka Nabiga iyo Raacidda Amarkiisa. Saas Darteed Yey Cumar binu Khadhaab iyo Caa‘ishaba U Fari jireen Muslimiinta inay Haweenkooda Baraan Suuraddan, Suuratu NUUR. An-Nuur (63-64).